

## **U guuridda xero qaxooti**

### **Xor baa loo yahay in xerada qaxootiga lagu noolaado**

Xerada qaxootigu waa meel lagu noolaan karo inta la sugayo jawaaabta codsiga magangelyada. Xor baa loo yahay, oo qofku asagaa dooranaya in uu xerada ku jirayo iyo in kale. Xeryaha qaxootiga waxaa maammula hay'ado, shirkado iyo degmooyin kala duwan – ayaga oo shaqadaas u qabanaya UDI.

### **Xerada aad ku noolaanayso waxaa go'aaminaya UDI**

Xerada qaxootiga ee aad ku noolaanayso adigu ma dooran kartid. Taas waxaa go'aaminaya UDI. Hal mar ayaa lagu siinayaa boos xero qaxooti. Marka lagu dhaho guurna, ma diidi kartid in aad guurto.

### **Haddii aadan rabin in aad ku noolaato xerada qaxootiga ama aad diiddo in aad guurto**

Haddii aadan rabin in aad ku noolaato xerada qaxootiga ee lagugu qoro, markaas waa in aad adigu soo heshaa meel aad ku noolaato.

Haddii aad diiddo in aad u guurto xerada qaxootiga ee lagugu qoro, waxaa lagaa saarayaa xerada qaxootiga ee aad hadda ku nooshahay.

## **Flytting til et asylmottak**

### **Å bo i mottak er frivillig**

Asylmottak er et sted du kan bo mens du venter på svar på asylsøknaden din. Det er frivillig, og du velger selv om du vil bo i mottak. Asylmottakene drives av ulike organisasjoner, firmaer og kommuner på oppdrag fra UDI.

### **UDI bestemmer hvilket mottak du skal bo på**

Du kan ikke bestemme hvilket asylmottak du skal bo på. Det er UDI som bestemmer det. Du får bare ett tilbud om plass i asylmottak, og når du blir bedt om å flytte kan du ikke nekte.

### **Hvis du ikke vil bo i mottaket eller nekter å flytte**

Hvis du ikke vil bo på det mottaket du blir tildelt, må du finne et eget sted å bo selv.

Hvis du nekter å flytte til mottaket du får tildelt vil du bli kastet ut av asylmottaket du bor på nå.